# XOOG KU GELIDDA IYO LA WAREEGIDDA (KA SAARIDDA) HOYGA WARAAQDA MACLUUMAADKA IYO CODSIGA DHEXDHEXAADINTA

- Waxa laguu soo diray dacwad guri ka saarid iyo maxkamad uga yeedhis ay ku qoran tahay taariikhda maxkamaddaada.
- Haddii aad soo xaadiri weydo maxkamadda taariikhda kiiskaaga loo muddeeyey, waxa ay u badan tahay in aad ka guuri doonto gurigaaga.

**Caawimo ayaa la heli karaa:**

**Caawimada bixinta kharashka kirada:**
Waxa aad kala xidhiidhaa MaineHousing: www.mainehousing.org/covidrent ama waxa aad ka wacdaa 1-800-452-4668. Waxa aad ku codsan kartaa onlayn ahaan ama adiga oo u maraya Hay'adda Waxqabaka Bulsheed "Community Action Agency" websaytka MaineHousing. Haddii aad u qalanto caawimo kirada ah, waxa sidoo kale dhici karta inaad awood u yeelato inaad caawimo ka hesho kharash bixinta biilasha korontada, biyaha iyo gaasta, helitaanka adeegyada la talinta guriyeynta, caawimada guuritaanka, iyo adeegyo kale si lagaaga caawiyo inaad haysato guri joogto ah.

**Caawimo Sharciyeed oo Kaa Ilaalinaysa Guri Ka Saarista:**

- Caawimo Qareen - Haddii aad u qalanto, waxa dhici karta inaad awood u yeelato inaad ka hesho caawimo sharciyeed oo bilaash ah Kaalmada Sharciyeed ee Pine Tree "Pine Tree Legal Assistance" ama Adeegyada Sharciyeed ee Dadka Waaweyn "Legal Services for the Elderly".
- Adeegyada Sharciyeed ee Dadka Waaweyn "Legal Services for the Elderly" - Bilaash u ah dadka ah 60 jirka iyo wixii ka weyn: Waxa aad ka wacdaa 1-800-750-5353.
- Kaalmada Sharciyeed ee Pine Tree "Pine Tree Legal Assistance" (PTLA) - Bilaash u ah kiraystayaasha dakhligoodu hooseeyo:
  Saacadaha khadka tooska ahi waxa weeyi Isniinta 12:00 – 2:30, Salaasada, Khamiista, Jimcaha 9:00 – 11:30. Waxa aad wacdaa 207-774-8211.
- Kulanada Macluumaadka: PTLA waxa ay qabataa kulano macluumaadka guri ka saarista ah oo toddobaadle ah oo bilaash ah Salaasooyinka wakhtigu marka uu yahay 9:00 gh.
  Waxa aad tagtaa ptla.org/fed si aad u hesho ikhtiyaarada taleefanka ama internetka/maqal iyo muuqaalka si aad wax dheeraad ah uga ogaato hannaanka guri ka saarista ee Maine.

**Caawimada La Talinta Guriyeynta:**
Adeegyada la talinta guriyeynta ayaa laga heli karaa hay'adaha baraha soo socda:
https://apps.hud.gov/offices/hsg/sfh/hcc/hcs.cfm?webListAction=search&searchstate=ME

**Hannaanka Maxkamadda:**

**Ogaysiiska ADA:** Laanta Garsoorka Maine waxa ay u hogaansan tahay Xeerka Dadka Maraykanka ah ee Naafada ah (ADA). Haddii aad u baahato goob nololeed oo macquul ah la xidhiidh Isuduwaha Marin u Helidda Maxkamadda, accessibility@courts.maine.gov, ama karraani maxkamadda ah.
**Adeegyada Luuqadda:** Si aad u hesho kaalmo luuqadeed iyo turjubaano, waxa aad la xidhiidhaa karaaniga maxkamadda ama interpreters@courts.maine.gov

for reference only

- **Waa inaad soo xaadirto dhegaysigaaga maxkamadda taariikhda ku qoran maxkamad uga yeedhistaada.** Maxkamad uga yeedhista ayaa sheegaysa goorta iyo sida loogu hortagayo maxkamadda guri ka saarista dhegaysi maxkamadeed, iyo haddii ay noqon doonto mid fool ka fool ah ama maqal iyo muuqaal ah ama taleefan ah. Haddii aad soo xaadiri weydo taariikhda dhegaysigaaga waxa dhici karta in guriga lagaa saaro.
- **Waxa aad dalban kartaa dhexdhexaadin. Dhexdhexaadintu waxa ay gacan ka geysan kartaa in xal laga gaadho kiiskaaga.** Qaadigu waxa uu amar kusoo saari karaa in dhexdhexaadin laga sameeyo kiiskaaga kahor dhegaysiga kiiska. Si aad u dalbato dhexdhexaadin, waa inaad adeegsato Foomka Codsiga Dhexdhexaadinta.
- **Su'aalo:** Haddii aad qabto su'aalo fadlan kala xidhiidh maxkamadda lambarka ku qoran maxkamad uga yeedhista.

<u>**Dhexdhexaadinta Kiisaska Guri Ka Saarista:**</u>
Labada dhinacba waxa ay dalban karaan dhexdhexaadin, ama qaaddi ayaa u gudbin kara kiiska dhexdhexaadin.

**Waa maxay dhexdhexaadintu?**
Dhexdhexaadinta, qof ay maxkamaddu ansixisay ayaa isku daya in uu ka caawiyo dhinacyada in ay heshiis gaadhaan. Qofkan waxa la yidhaa dhexdhexaadiye waxana uu ku tababaran yahay in uu ka caawiyo dhinacyada inay daahfuraan xalal isaga oo aan la kala safaneyn dhinacyada. Qaar kamid ah ikhtiyaarada heshiisku waa: qorshe kharash bixinta kirada ah oo kiraystaha loogu deynayo guriga kirada ah, dejinta taariikh guuritaan, ama xal kale oo kiraystaha iyo mulkiilaha labadooduba ay ku heshiiyaan. Dhexdhexaadinta waxa lagu qabtaa Zoom iyada oo lagu qabanayo maqal iyo muuqaal ama taleefan, ama waxa lagu qabtaa fool ka fool.

**Yaa joogi doonaa halkaas?**
Dhexdhexaadiyaha, **adiga**, qareenkaaga haddii aad leedahay mid, **dhinaca kale** iyo qareenka dhinaca kale haddii ay leeyihiin mid. Dad kale ayaa u joogi kara taageero ahaan.

**Sida loo dalbado dhexdhexaadin:**
Haddii aad jeclaan lahayd dhexdhexaadin in loo qabto kiiskaaga, u dir ama keen foomka Codsiga Dhexdhexaadinta ee hoose maxkamadda.

for reference only

**Ogaysiiska ADA:** Laanta Garsoorka Maine waxa ay u hogaansan tahay Xeerka Dadka Maraykanka ah ee Naafada ah (ADA). Haddii aad u baahato goob nololeed oo macquul ah la xidhiidh Isuduwaha Marin u Helidda Maxkamadda, accessibility@courts.maine.gov, ama karraani maxkamadda ah.
**Adeegyada Luuqadda:** Si aad u hesho kaalmo luuqadeed iyo turjubaano, waxa aad la xidhiidhaa karaaniga maxkamadda ama interpreters@courts.maine.gov

## CODSIGA DHEXDHEXAADINTA

☐ Waxa aan jeclaan lahaa in dhexdhexaadin loo qabto kiiskayga.

Waxa aan ahay ☐ eedaysanaha (kiraystaha). ☐ dacwo bilaabaha (mulkiilaha guriga).

Magacaygu waa (fadlan far waawayn ku qor): ______________________

Taleefanka gacanta: ______________________

Cinwaankayga iimeylku waa: ______________________

Magaca dhinaca kale ee ku qoran maxkamad uga yeedhista iyo dacwadda: ______________________

Cinwaanka hantida kirada ah: ______________________

Illaa inta aan ogahay, taleefanka gacanta ee dhinaca kale waa: ______________________

Illaa inta aan ogahay, cinwaanka iimeylka ee dhinaca kale waa: ______________________

Macluumaadka shakhsiyeed ee ku qoran foomkan keliya waxa loo adeegsan doonaa ujeedooyin maxkamadeed lalamana wadaagi doono dadweynaha.

Taariikhda (*mm/dd/yyyy*): ______________ ► ______________________

Saxeexa

for reference only

**Ogaysiiska ADA:** Laanta Garsoorka Maine waxa ay u hogaansan tahay Xeerka Dadka Maraykanka ah ee Naafada ah (ADA). Haddii aad u baahato goob nololeed oo macquul ah la xidhiidh Isuduwaha Marin u Helidda Maxkamadda, accessibility@courts.maine.gov, ama karraani maxkamadda ah.

**Adeegyada Luuqadda:** Si aad u hesho kaalmo luuqadeed iyo turjubaano, waxa aad la xidhiidhaa karaaniga maxkamadda ama interpreters@courts.maine.gov